



SOMALISKA

Doorashada gobolku waxay saamayn ku yeelanaysaa nolashaada caadiga ah

13 Sebtembar 2026 waxaa dhici doonta doorashada golaha gobolka Västra Götaland. Siyaasiyiinta golaha gobolka ayaa go'aaminaya sida loo maamulayo gobolka Västra Götaland.

Maxay ku saabsan tahay doorashada gobolku?

Gobolka Västra Götaland wuxuu mas'uul ka yahay waxyaalo saamayn ku yeelanaya nolashaada caadiga ah sida caafimaadka- iyo daryeelka cudurrada, daryeelka caafimaadka ilkaha, dhaqanka iyo gaadiidka dadwaynaha. Waxaan sidoo kale ka shaqaynaa ganacsiga, bey'adda iyo caafimaadka dadwaynaha.

Doorashada gobolku waxay ku saabsan tahay:

- Daryeelka caafimaadka ee laga helo isbitaalka, rugta caafimaadka ama daryeelka caafimaadka ilkaha ee dadwaynaha.
- Safarrada basaska, tareenada magaalada ka dhex shaqeeya iyo tareenada gobolka.
- Tagitaanka goobaha dhaqanka sida GöteborgsOperan (Guriga masraxa Göteborg), Göteborgs Botaniska trädgård (beerta dhirta Göteborg) iyo dhowr matxaf oo kale.

Maxaad saamayn ku yeelan kartaa?

Waxaad u codaynasaa xisbiga iyo siyaasiyiinta aad u aragtid inay u taliyaan gobolka Västra Götaland afarta sano ee soo socota.

Xisbiyada hela codadka ugu badan hela ayaa golaha gobolka ka heli doona xubnaha ugu badan. Golaha gobolku wuxuu go'aamin doonaa heerka canshuurta gobolka iyo sida lacagta loo isticmaalayo. Golaha gobolku wuxuu go'aaminayaa sida loo horumarinayo hawlaha shaqo iyo siyaasiyiinta ku jiri doona guddiyada iyo maamullada kale.

Yaa loo oggolyahay inuu codeeyo?

Waxaad codayn kartaa haddii aad gaartay 18 sano ugu danbayn maalinta doorashada kana diiwaangashan tahay meel ka mid ah gobolka Västra Götaland. Waa in aad sidoo kale tahay:

- muwaadin iswiidhish ah ama
- muwaadin ka tahay waddan Midowga Yurub ka tirsan, Aysland , Norway ama
- muwaadin ka tahay waddan kale, ama dal-laawe tahay (dal lahayn), oo aad ka diiwaangashanayd Iswiidhan muddo ugu yaraan saddex sano oo xiriir ah ka hor maalinta doorashada.

Doorashada golaha gobolku waxay dhacdaa isla maalinta doorashada qaranka iyo doorashada degmada. Kasii akhri wixii dheeri ah oo ku saabsan doorashada gobolka www.vgregion.se/regionval (warbixin af iswiidhish ah).